





Cudurka Neef-mareenka (Pneumococcal)

Xaashida xaqiqada



Cudurka neef-mareenka (Pneumococcal) waxaa sababa bakteeriyo. Cudurku wuxuu badan yahay jiilaalka iyo gu'ga, laakiin wuxuu iman karaa wakhti kasta oo sanadka ah. Infekshannada neef-mareenka (Pneumococcal) waxay u dhixeyaa caabuqyada dhegta iyo sanka ilaa caabuqyada oof-wareenka iyo dhiigga.



Cudurka wuxuu qof-ba-qof ugu kala gudbaa qufaca, hindhisada, ama taabashada dhacaanka neefsiga. Bakteeriyada keenta cudurka waxay ku noolaan kartaa sanka iyo cunaha carruurta iyo dadka waaweyn ee caafimaadka qaba iyada oo aan la bukoon.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho Daran
iyo Qarqaryo



Qufac



Dhago xanuun



Qoor Adayg




Madax-xanuun



Jahwareer Maskaxeed

Calaamadaha kale waxaa ka mid ah neefta oo yaraata iyo fahmo darro guud.



La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad u malaynayo in adiga ama xubnaha qoyskaagu aad qabto cudurka neef-mareenka (Pneumococcal). Cudurkan waxaa lagu daaweyaa antibiyootik. Dadka qaba jirro daran waxay u baahan karaan in lagu daweyo isbitaalka.

Xanuun daran



Cudurka Neef-mareenka (Pneumococcal) ayaa aad khatar ugu ahaan kara carruurta yaryar iyo dadka waaweyn. Maskaxda iyo dhibaatooyinka kale ee waxbarasho, lumis maqal, iyo xitaa dhimasho ayaa dhici karta inta lagu jiro ama kadib caabuqyada.

Yuu Ku Dhici Karaa Cudurka Neef-mareenka (Pneumococcal)?



Qof kasta ayuu ku dhici karaa cudurkan. Dadka halista ugu badan ku jira waxaa ka mid ah:

- Carruurta ka yar 2 sano iyo kuwa ku jira xanaanada
- Dadka da'doodu tahay 65 sano iyo wixii ka weyn
- Dadka qaba dhibaatooyinka caafimaad qaarkood ama habdhiska difaaca jirkoodu dacif yahay

Kahortagga




Sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo cudurkaan waa in tallaal la qaato. Laba tallaal oo kala duwan ayaa la heli karaa si looga hortago cudurkan. Kala hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka si aad u hubiso inaad wada qaadatay tallaalada.



Dhaqidda gacmahaaga iyo ku daboolidda qufacaaga iyo hindhisadaada xusulkaaga sidoo kale waxay kaa caawin kartaa ilaalinta adiga iyo dadka kale.

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/pneumococcal
2. www.cdc.gov/pneumococcal

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.